

Ku dhaqan Xafiis D.

FAAFINTA

الرسمية

OFFICIAL



RASMIGA AH

الجريدة

BULLETIN

EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

Sanadka 1aad

Muqdisho, 30' September 2014

Lr. 4

Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah
Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda

FAAFIN BIL SOO BAXA

Qiimaha waa \$XXX Dollar, lambar waliba – RUKUNKA: Sanaddii waa \$XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa \$XXX Dollar. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa \$XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

KOBNIIN

BOGGA KOOWAAD

SHARCI

W.M

BOGGA LABAAD

XEER

Bilaha

AUGUST, SEPTMEBER

2014

Madaxweynaha J.F.S.,

- Markuu Arkay:** Qodobka 87, Faqradda 1aad, Xarafka 'C' iyo Faqradda 2aad Dastuurka Federaalka KMG
- Markuu Arkay:** Xeer Madaxwayne Lr.29 ee soo baxay 19/11/2013 kuna saabsan magacaabista Guddoomiyaha Hey'adda Cilmi Baarista Badaha Soomaaliyeed si uu dardar u geliyo Dhismaha Hay'adaan
- Markuu Arkay:** Go'aanka Golaha Wasirada Lr. SHGW. 00.60.11.14 ee la gaaray 14/11/2013 laguna ansaxiyay Xeemidaamiyaha Masmulka Hey'adda Cilmi Baarista Badaha Soomaaliyeed
- Markuu Wixgeliyay:** In ay jirto baahi loo qabo in kor loo qaado aqoonta cilmiyaysan ee Badaha Soomaaliyeed
- Markuu Ku qancay:** Soo jeedinta Golaha Wasirada ee ku saabsan abuuridda Hey'addaas

Waxa uu soo saaray Xeerkan:

Qodobka 1.

Laga billaabo marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo Xeerkan, waxaa la dhisay Hey'adda Cilmi Baarista Badaha Soomaaliyeed.

Qodobka 2

Waxa ay Hey'addan u xilsaaran tahay in ay si cilmiyaysan u baarto arrimaha la xariira badaha Soomaaliyeed si loo helo talo ay Dowladdu ku gaarto go'aamada khuseeyo badaha iyada oo hawlgelinaysa kana faa'iidsanaysa aqoonyahannada Soomaaliyeed iyo kuwo kaleba.

Qodobka 3

Hey'addaan waa hey'ad madaxbannaan oo leh shakhsiyad qaanuuni ah waxaana kormeer iyo joosin ku leh Wasirka Wasaaradda Gaadiidka Badda iyo Dekadaha. Waxa ay Hey'addu awood u leedahay in ay qoroto shaqaale maamul iyo xirfadlayaal aqoon u leh cilmiiga badaha oo joogto iyo waqti-dhiman ah iyada oo la waafajinaayo Sharciga Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda Lr. 11 ee 05/12/2006

Qodobka 4

Waxa uu Xeerkan dhaqangelayaa marka uu Madaxwaynuhu saxiixo waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliyeed.

MUQDOSHO 21/08/2014

Yusuf Macallin

Hon. Yusuf Macallin Amlin
Wasirka Dekadaha & Gaadiidka Badda

XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD	
WAA LA DIMAAN GELIYEY	
DIMAAN NO.	11/10/2014
TAARIKH	21/08/2014
SAXIIXA NO.	

Abdane Xasan Sheikh Maxamuud
Madaxweynaha J.F.S